War faafin

# Barta gurmadka sicir bararka iyo lacagaha ayaa dhawaan la bilaabi doonaa

Janaayo 09, 2023

## Lacagta bilaha ah ee $100 ah ee kaabista ah ee qoysaska, waayeelka, iyo dadka reer Alberta ee nugul ayaa dhawaan la shaacin doonaa, dadka reer Alberta-na hadda ayay bilaabi karaan diyaar garoow.

Dhaqaalaha Alberta ayaa si xoog leh usoo kabsaday, laakiin dad badan ayaa wali la daalaa dhacaaya kulayliyaha guryahooda iyo quudinta qoysaskooda. Dawlada Alberta ayaa tan kaga rogaal celisay kaalmada sicir bararka ee ugu ballaaran Canada oo dhan, oo leh taageerooyin muuqda oo ah kuwaasoo kaalmooyin dadka oo dhan ah iyo kuwo dad gaar ahba bixinaya. Laga bilaabo bishan, lacagaha kaalmada oo lix bilood soconaaya ayaa loo bilaabi doonaa dadka Alberta ayadoo lasoo marsiinaayo nidaamka codsiga iyo qaybinta kaasoo dhakhso badan, waxtar badan oo ammaana ah.

Laga bilaabo Janaayo 18, dadka waayeelka ah ee jira 65 ama ka wayn ee aan qaadan Gunnooyinka Waayeelka ee Alberta iyo waalidiinta u qalma ee ay u joogaan carruurta da'doodu ka yar tahay 18 sanno ayaa ka codsan kara oonlayn barta dawlada ama si toos ah u tagi kara xarumaha ku yaala gobalka oo dhan si ay u helaan lacagaha kaalmada ah ee bil kasta oo dhan $600.

Si ay u adeegsadaan barta oonlaynka ah, waalidiinta iyo waayeelka u qalma waa inay lahaadaan Ciwaan la Xaqiijiyay. Si loo xaqiijiyo in hanaanka codsigu uu noqdo mid fudud sida ugu macquulsan, dadka reer Alberta waa inay diiwaan gashaan Ciwaankooda La xaqiijiyay ama ay xaqiijiyaan inay Ciwaan La Xaqiijiyay haystaan kaasoo xogtiisu sugan tahay sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Qaybta: Dadwaynaha

Dad badan oo reer Alberta ah kuwaasoo qaata lacagahan kaalmada gaarka ah ayaa si otomaatig ah looga diiwaan gashaa barnaamijka umana baahna inay codsadaan si ay u helaan gunnada.

Si lamid ah Daryeel Bixiyaasha iyo Qaraabada Ilmaha Dawladu Koriso, qof kasta oo gunnooyinka joogtada ah ee bilaha ah ka qaata Dakhliga Sugan ee Dadka Naafonimad daran qaba (AISH), Taageerada Dakhliga ama Gunnada Waayeelka Alberta, ama qaata adeegyada barnaamijka Dadka qaba Naafada Kobaca (PDD) ayaa si otomaatig ah u heli doona lacagta koobaad laga bilaabo Janaayo 31.

## Lacagta kaalmada ah ee la siiyo macaamiisha AISH, Taageerada Dakhliga iyo macaamiisha PDD

Dhammaan macaamiisha hela AISH, Taageerada Dakhliga ama PDD ayaa si otomaatig ah looga qori doonaa barnaamijka umana baahna inay isdiiwaan gashaan si ay u helaan gunnooyinkooda. Waxay heli doonaan lacagtooda koobaad ee $100 ah laga bilaabo Janaayo 31.

- Lacagaha waxaa lagu bixin doonaa isla qaabka ay macaamiishu ku helaan gunnooyinka joogtada ah ee bilaha ah, haddii ay tahay mid toos loogu shubaayo akoonadooda ama mid jeeg lagu siinaayo.
- Lacagaha waxaa jeeg ahaan lagu siin doonaa macaamiisha horey u diiwaan gashan ee PDD ee aan qaadan gunnooyinka AISH ama Taageerada Dakhliga.
- Dadka qaata gunnooyinka ayaa sidoo kale si toos ah loogu wargelin doonaa diiwaan gelintooda barnaamijka lacag bixinta iyo xogta la xariirta.
- Lacagahaan waxaa loo qaadan doonaa dakhli ka madax banaan barnaamijka AISH iyo Taageerada Dakhliga mana saamayn doonaan u qalmida dheefaha maaliyadeed.
- Waalidiinta ku jira barnaamijyadan ee ay u joogaan carruurta da’doodu ka yar tahay 18 sanno ayaa sidoo kale heli kara $600 oo lacag dheeri ah cunugiiba. Waa inay ku codsadaan oonlayn ama si toos ah lacagahaan laga bilaabo Janaayo 18.

## Lacagaha kaalmada ah ee waayeelka

Dhammaan dadka reer Alberta ee jira 65 sanno ama ka wayn ee hela dakhli ka hooseeya $180,000 ayaa dhawaan u qalmi doona lacag $600 oo lagu bixin doono mudada kaalmada lixda bilood ah.

Dadka reer Alberta ee qaata Gunnada Waayeelka Alberta ayaa si otomaatig ah looga diiwaan galin doonaa barnaamijka umana baahna inay isdiiwaan gashaan si ay u helaan dheefaha. Qaybinta lacagaha dheeriga ah ee bilaha ah ayaa bilaaban doonta Janaayo 31.

Waayeelka u qalma ee aan qaadan Gunnada Waayeelka Alberta ayaa u baahan inay codsadaan lacagaha kaalmada ayagoo furanaaya ama xaqiijinaaya Ciwaankooda La Xaqiijiyay kadibna gunnooyinka ka codsanaaya barta oonlaynka ah ama si toos ah u tagaaya xafiiska diiwaan gelinta ama Alberta Supports marka barta oonlaynka ah ay furanto Janaayo 18.

## Lacagaha kaalmada ah ee waalidiinta ama masuuliyiinta daryeela carruurta kayar 18 sanno

Qoysaska dakhligoodu ka hooseeyo $180,000 sannad kasta ayaa dhawaan heli doona lacag wadarteedu dhan tahay $600 oo ay ku helaan ilmo kasta oo ay daryeelaan oo ka yar 18 muddo lix bilood ah. Waalidiinta u qalma ayaa codsan kara lacagta kaalmada ah ayagoo furanaaya ama xaqiijinaaya Ciwaankooda La Xaqiijiyay kadibna gunnooyinka ka codsanaaya barta oonlaynka ah ama si toos ah u tagaaya xafiiska diiwaan gelinta ama Alberta Supports marka barta oonlaynka ah ay furanto Janaayo 18.

## Lacagaha kaalmada ah ee daryeeleyaasha ilmaha dawladu koriso iyo kuwa qaraabada u ah ilmaha ee daryeela carruurta ka yar 18 sanno

Daryeeleyaasha ilmaha dawladu biisho ama qaraabada u ah ee daryeela ilmo ka yar 18 sanno ayaa si otomaatig ah looga diiwaan gelin doonaa barnaamijka umana baahna inay isdiiwaan gashaan si ay u helaan lacagaha kaalmada ah. Waxay heli doonaan lacagtooda koobaad dhammaadka Janaayo.

- Lacagaha waxaa lagu bixin doonaa isla qaabka loo baxsho gunnooyinka joogtada ah ee bilaha ah, haddii ay tahay mid toos loogu shubaayo akoonadooda ama mid jeeg lagu siinaayo.
- Lacagaha bilaha ah ayaa la bilaabi doonaa laga bilaabo janaayo 31.

Dawlada Alberta ayaa bixinaysa kaalmada degdegga ah ee qarashka nolosha iyo sicir bararka ayadoo haddana ka shaqaynaysa taageerida kaalmada mudada dheer ah. Dadka reer Alberta ayaa xog badan ka ogaan kara dhammaan barnaamijyada guud iyo kuwa gaarka ah ee kaalmada oonlaynka.

## Macluumaad kooban:

- Dawlada Alberta ayaa adeegsan doonta xogta canshuurta CRA 2021 si ay u xaqiijiso u qalmida lagu salaynaayo dakhliga.
- Codsiyada ayaa lasoo gudbin karaa ilaa Juun 30, ayadoo lacaguhu noqonayaan kuwo horey kasoo biloowda si loogu daro bilihii hore ee qofku u qalmay kaalmada.
- Marka hawsha codsiga la dhammaystiro, inta badan dadka Alberta ayaa heli doona lacagaha dhammaadka bishaas. Waqtiga ayaa ukala duwan dadka.
- Alberta ayaa lahayd ciwaannada la xaqiijiyay lagasoo bilaabo 2015 oo ah qaab dadka reer Alberta ay si ammaan ah ku helayaan adeegyada sii kordhaaya ee dawlada.
- Si lamid ah dhammaan ciwaannada oonlaynka ah, dadka Alberta waa inay adeegsadaan baasweero adag aysana cid kale u sheegin baasweerkooda. Tilmaamaha ku aadan sida loo abuuro baasweer adag ayaa laga heli karaa webseedka Dawlada Alberta.
- Dawlada Alberta ma soo diri doonto farriimo qoraal ah ama iimeelo looga codsanaayo dadka Alberta inay soo diraan xogtooda gaarka ah ama tan baanka si ay u helaan lacagaha.

Xog dheeraad ah, ayna ka mid yihiin fiidiyawyo iyo jawaabaha su’aalaha, ayaa laga heli karaa barta alberta.ca/affordable.

## Macluumaadka la xiriira

- Lacagaha kaalmada ah

- Furo ama hubi xaalada Ciwaankaaga La Xaqiijiyay
- Qorshaha Waxqabadka ee Kaalmada

## Warbaahinta

- Daawo war saxaafadeedka
- Muuqaalka: Sida loo codsado lacagahaaga kaalmada ah